

911 WAXA LAGA WICI KARAA TELEFON KASTA OO GURI, TELEFONKA GACANTA, VOIP AMA TTY.



Marka aad ka wacdo 911:

♦ **Telefon guri** – Waxaad si otomaatika ugu xiramaysaa Adeegga Booliiska Windsor. Waxay leeyihiin qaab sare ee macluumaadka 911 oo ay ku jiraan cinwaanka aad ka soo wacayso. Tusaalooyinku waa telefonada lacagta iyo telefonada guriga.

♦ **Telefonka gacanta** – Waxaad ku xiran tahay taallada PSAP ee ugu dhaw telefonka aad isticmaalayso. Sharikadaha telefonada aan xarkaha lahayn waxay siiyaan wacayaasha adeeg balaadh iyo dhumucba leh. Macluumaadkan waxay leeyihiin heerar kala duwan oo saxsanaaneed. Haddii aad isticmaalayso telefon guri ama mid gacanta ah, waxa lagu weydiin doonaa inaad sheegto goobta aad joogto si loo hubiyo jawaab sax ah.

♦ **Telefonka VOIP** – Haddii aad ka soo wacdo 911 telefonka nooca la yidhaa “Voice Over Internet Phone – VOIP”, waxaad ku xirmi doontaa PSAP (aan ahayn gudaha Windsor) dabeedna waxa laguu wareejin doonaa adeegga booliiska jiidaada. Lama hayo macluumaadka goobta aad joogto. Waxa kale oo aad ogaanaysaa, in adeegga VOIP aanu shaqayn marka korontadu go’an tahay ama marka internet aanu jirin.

HA U WICIN 911 SABAB AH:

- ◊ Warasyi guud
- ◊ Buuq, cabasho xayawaan ama baarkin
- ◊ Dhibaatooyin koronto ama biyo
- ◊ Si aad u hesho macluumaad la xiriira dawladda
- ◊ Gargaar xagga tilmaanta ama lambarka booliiska ee xaalad aan degdeg ahayn
- ◊ Macluumaad dugsiga xiri-taankiisa, xaaladda jid ama tilmaan socdaal baabuur

LAMBARADA TELEFONADA ADEEGYADA MAGAALADA WINDSOR

211 - Ka wac macluumaadka adeegyada bulshada, caafimaadka ama dawladda.

311 - Ka wac macluumaadka ama codsashada adeegyada magaalada Windsor.

LAMBARADA TELEFONADA AAN AHAYN XAALAD DEGDEGA


BOOLIISKA	519-258-6111
DABKA	519-258-4444
AMBALAANS	519-258-2155



Xaalad Degdega

9 1 1

Booliis·Dab·Ambalaans



www.police.windsor.on.ca


WAXAAD FILANAYSO MARKA AAD U WACDO 911



Adeegyada Booliiska Windsor waa Goobta Kajawaabista Ammaanka Dadweynaha “Public Safety Answering Point (PSAP)” meesha dhammaan wicitaanada 911 looga jawaabo Magaalada Windsor. Markaad gargaar u wacato 911, isdeji oo ku jir khadka. Haddii aad rabto qolada dabka ama ambalaans, waxa lagu wareejin doonaa hay’adda saxda ah. Haddii aad booliis waxa lagu weydiin su’aalo iyada oo saraakiil loo soo dirai doono goobtaada.

Su’alaaha caadiga ah:

- * Halka ayey wax ka dhaceen?
- * Goorma ayey tani dhacday? ?
- * Maxaa dhacaya? Waayo?
- * Ayaa ku hawlan?
- * Miyaad aragtay wax hub ah? Cidna ma sheegtay hub?
- * Tilmaanta dadka ku hawlan?
- * Tilmaanta socdaalka?
- * Ma baabuur ayaa ku jira? Waa maxay taargada baabuurku? Tilmaanta socdaalka?
- * Magacaaga, cinwaanka, lambarka telefonka & taariikhda dhalashada.




Booliis, Dab, Ambalaans Gargaarku wuxu kuu jiraa 3 lambar oo keliya.




TALOOYINKA WICITAANKA 911

- ◆ Usheeg ilmaha in 911 loogu talogalay keliya xaaladda degdega ah oo bar sida loo garaaco.
- ◆ Hubi inaad joogto meel ammaan ah.
- ◆ Iskuday inaad isdejiso oo raacdo fariimaha lagu siiyo.
- ◆ Si fiican u dhagayso & ka jawaab dhammaan su’aalaha. Gargaar ayaa soo socda oo macluumaadka aad ururisaa waxay muhiim u yihiin saraakiisha kuu jawaabaysa.
- ◆ Ha dhigin telefonka haddii aad ku qaldanto garaacista 911, waayo booliska ayaa iman goobta aad joogto si ay kuu fiiriyaan.



Xarumaha xaaladda degdega ee 911 waxay shaqeeyaan 24 saac maalintii, 365 maalmood sannadkii.

Wicitaanka 911 wuxu badbaadin karaa naftaada oo wuxu kaa gargaari karaa badbaadinta nafaha kuwa kale.



Xaalad degdega waxa lagu macneeyaa kadeed lama filaana oo u baahan tallaabo degdega.

Tusaale:

- * Adiga ama qof kale dhaawacmay oo u baahan waxkaqabasho caafimaad.
- * Dab ama qiiq la dareemay.
- * Denbi keenay dhaawac, keeni kara dhaawac ama xaalad naf halis ku ah.
- * Adiga oo dabasocda dirawal sakhraansan.
- * Dhac ama tuugo la gaystay.
- * Qof u qayshanaya gargaar.
- * Dhawaaqa quraarad la jabiyeey maqalkeeda.
- * Qarax ama qori dhacay oo la maqlay.
- * Shil baabuur oo halkaas ka dhacay.
- * Qof ku weydiistay wicitaanka 911 xaalad aan la garanayn.